**Loogu tala galay adigaaga heysta dhalashada ajnabiga ah**

# Taageero waxbarasho oo ka socota CSN oo loogu tala galay waxbarasho (kaalmo iyo deyn)

Ma ku fikireysaa ka qof weyn ahaan in aad Swiidhan wax ku baratid? Markaas waxaad codsan kartaa caawimaad dhaqaale oo waxbarasho, macnaha kaalmo iyo deyn ka imaanaya CSN. Kaalmada waa lagu siinayaa, laakiin deynta waa in aad dib soo celisaa. CSN waa hey'adda gacanta ku haysa taageerada waxbarashada swiidhishka. Taageerada waxbarashada fadligeeda ayey dhammaan kuwa doonaya waxbaran karaan, iyadoo aan loo eegeynin gadaashooda dambe iyo duruufahooda dhaqaale. Halkan waxaad ka akhrisan kartaa sida ay wax yihiin marka la eego adigaaga heysta dhalashada ajnabiga ah

## Codso kaalmo dhaqaale oo waxbarasho

Waxaad kaalmada dhaqaale ee waxbarashada ku codsaneysaa Bogaggeyga gudohooda ee barta www.csn.se Haddii aadan dooneynin in aad lacag deynsatid wey soconeysaa in aad kaalmada oo keliya aad codsatid.

Barta intarneedka ee CSN: www.csn.se waxaa ku jira warbixin dheeraad ah

## Shuruudo gaar ah oo loogu tala galay adigaaga heysta dhalashada ajnabiga ah

Marka aad tahay muwaadin ajnabi ah CSN waxaa ay ugu horreynta baareysaa in aad xaq u leedahay kaalmo dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah. Markaas ka dibna waxaannu mararka qaar fiirineynaa in aad sharci degganaansho leedahay iyo in kale. Ka dibna waxay CSN baareysaa in aad buuxineysid shuruudaha kale si aad u heshid kaalmo dhaqaale oo waxbarasho.

**Shuruudaha loo baahanyahay in la buuxiyo si xaq loogu yeesho taageero waxbarasho oo swiidhish ah**

Haddii aad sharci degganaansho oo joogto ah (PUT) leedahay, deggantihidna Swiidhan xaq baad badanaa u leedahay kaalmo dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah. Haddii aad Hey'adda qaxootiga ka heshay sharci degganaansho oo waqti go'an ah iyadoo ay sababtu tahay xaalad qaxootinnimo ama wax u eg xaq baad sidoo kale badanaa u leedahay taas. Laakiinse ka megengelyo doon ahaan xaq uma lihid taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah.

Haddii aadan haysan PUT ama aan lagaala mid dhigi karin qaxooti, waxaa jira sharciyo kala duwan oo taas khuseeya hadba haddii aad muwaadin ka tihid EU/EES ama Switzerland ama haddii aa heysatid jinsiyad kale. Waxbadan waxaad ka akhrisan kartaa warqadda macluumaadka dhabta ah ee "Taageerada dhaqaale ee loogu tala galay waxbarashada Swiidhan ee loogu tala galay adigaaga heysta dhalashada ajnabiga ah" (CSN nr 4146).

Warqadda macluumaadka dhabta ah oo ah luqada kala duwan waxay ku jirtaa www.csn.se

CSN nr 2443H/1612

**Shuruudaha kale si loo helo taageero dhaqaale oo waxbarasho**
Si aad xaq ugu yeelatid taageero dhaqaale oo waxbarasho waa in xitaa aad

- dhigataa waxbarasho xaq kuu siineysa taageero dhaqaale oo waxbarasho
- wax dhigataa ugu yaraan boqolkiiba 50 oo ka mid ah waqti buuxa ugu oo soconaya ugu yaraan seddax usbuuc
- buuxisaa shuruudaha da'da ee loo baahanyahay*
- ka soo baxdaa natiijadaada waxbarashada (waxay ku khuseysaa oo keliya haddii aad horay taageero dhaqaale oo waxbarasho wax ugu dhigatay).

* Haddii aad dhigatid dugsi hoose-dhexe- ama heer dugsi sare, tusaale ahaan waxbarashada dadka waaweyn, waad heleysaa taageero dhaqaale oo waxbarasho laga billaabo xilli dugsiyeedka sannadka aad buuxineysid 20 sano. Markaas ka hor waxaad CSN ka heli kartaa kaalmo waxbarasho, taasoo ah kaalmooyin kale. Heerka jaamacadda ma jiro wax xad ah oo da' ahaan ugu hooseeya. Inta ugu dheer waxaad taageero dhaqaale oo waxbarasho heli kartaa ilaa iyo sannadka aad buuxineysid 56.

## Imisa ayaad kaalmo iyo deyn u qaadan kartaa?

Bogga www.csn.se ayaad ka arki kartaa imisa ayaad u heli kartaa kaalmo ahaan iyo imisa ayaad deynsan kartaa.

Xaaladaha qaar waxaad heli kartaa kaalmo badan, waadna ka deynsan kartaa CSN lacag dheeraad ah. Halkan ayaad ka akhrisan kartaa xagga kaalmada dheeraadka ah iyo deynta jirta:

Halkan ka akhriso kaalmooyinka kala duwan iyo sida ay wa u soconayaan www.csn.se ama wac 0771-276 000

**Kaalmo sarreysa**
Haddii aad dhiganeysid dugsi hoose-dhexe- ama dugsi sare waxaad mararka qaar qaadan kartaa qeyb weyn oo kaalmo ah. Si aad taas u heshid waa in aad buuxisaa shuruudo gaar ah ee leysaga baahanyahay. Haddii aad xaq u leedahay kaalmo sarreysa, si ootomaatik ah ayaad u heleysaa taas marka aad codsatid taageerada dhaqaale ee waxbarashada.

**Kaalmo laysugu daro carruur darteed**
Haddii aad waalid u tahay carruur waxaad heli kartaa kaalmo laysugu daro. Taas waxaad heli kartaa ilaa iyo sannad-barka uu canuggu buuxinayo 18 sano.

**Deynta la isugu daro**
Haddii aad horay u shaqeysay oo aad lahayd dakhli ka sarreeya ilaa xad go'an waxaad codsan kartaa deynta la isugu daro. Deynta waxaa loogu tala galay si loo fududeeyo isaga gudbidda u dhexeysa shaqada iyo waxbarashada. Waxaad heli kartaa deynta la isugu daro laga billaabo sannadka aad buuxineysid 25.

**Deynta kharashaadka dheeraadka ah**
Ma jiraan kharashaad dheeraad ah oo la xiriira waxbarashadaada, tusaale ahaan laba deegaan ama safarro go'an? Markaas waad codsan kartaa deyn ku aaddan kharashaadka dheeraadka ah.

CSN nr 2443H/1612

## Ilaa imisa ayaad qaadan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho?

Waqti go'an ayaad qaadan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho. Sidaas darteed waa in aad ka fikirtaa in aad qorsheysid waxbarashadaada, si ay taageerada dhaqaale ee waxbarashadu ugu filnaato waqtiga waxbarashadaada oo dhan.

Tusaale:
Xagga heerka dugsiga sare waxaad taageero dhaqaale oo waxbarasho qaadan kartaan 80 ama ugu badnaan 120 usbuuc, hadba wixii aad horay u dhigatay iyadoo ku xiran. Taasi waxay u dhigantaa ku dhawaan labo ama seddax sano oo taageero dhaqaale oo waxbarasho oo buuxda la qaato.

Xagga heerka jaamacadda waxaad taageero dhaqaale oo waxbarasho heli kartaa ugu badnaan 240 usbuuc oo waqti buuxa ah. Waxay ku dhirir tahay waxbarasho waqti buuxa muddo lix sano ah.

## Waxa ay tahay in lagu fikiro inta waxbarashada lagu jiro

Haddii ay wax isbeddelaan inta waxbarashadu socoto waa muhiim in aad taas ku wargelisid CSN-ta si laguugu soo shubo lacag sax ah. Isbeddelku wuxuu tusaale ahaan noqon karaa in aad dhiganeysid dhibco yar ama in aadan sii haysan wax sharci degganaansho ah. Wargelintaada waxaad ku sameyn kartaa Bogaggeyga gudohooda ama si kale nagula soo xiriir.

Soo wargeli sidoo kale haddii aad xanuunsatid ama aad u baahatid in aad guriga joogtid si aad u daryeeshid carruur ama xigto kuu dhaw – siiba maalinta ugu horreysa ee maqnaashada. Markaas waad haysan kartaa taageeradaada dhaqaale ee waxbarasho iyadoo aan usbuucyada la isticmaalay la xisaabinnin, iyadoo ay dheeraad tahay in shuruudda natiijada waxbarashadu yaraaneyso.

Cudurka ku wargeli Qasnadda ceymiska, daryeelka carruurtana CSN

## Lacag dib u bixin

Lacagta aad ka deynsatay CSN shaki la'aan dib ayaad u soo celineysaa – iyadoon loo eegeyn in aad Swiidhan sii deggantihid iyo in kale. Caadi ahaan waxaad dib u bixinta lacagta billaabeysaa ugu horreyn lix bilood ka dib markii aad ugu dambeynti ka qaadatay CSN taageero dhaqaale oo waxbarasho. Inta aad sannad walba dhiibeysid waxay ku xirantahay waxyaabo ay ka mid yihiin inta mushaarkaagu uu yahay, ilaa inta aad dhiibeysid deynkaaga iyo inta uu dul saarkaagu gaarayo.

Laakiin waxaa jira waqti xadeysan Deynkaaga waxaad ku dhiibeysaa ugu badnaan 25 sano waana in dhiibitaanku uu dhammaado marka aad jirtid 60 sano. Badanaa waxaad dhiibeysaa xoogaa in yar billawga hore, dhammaadkana xoogaa in badan. Dabcan haddii aad dooneysid si ka degdeg badan waad u dhiibi kartaa, adiga ayaa taas go'aankeeda leh.

Hadii ay kugu adagtahay in aad dib dhiibtid lacagta, tusaale ahaan iyadoo uu dakhligaagu yaraaday, waxaad codsan kartaa intii waqti ah in aad dhiibtid in yar. CSN ayaa eegaya codsigaaga oo arkaya haddii aad xaq u leedahay in aad dhiibtid in yar.

CSN nr 2443H/1612

Ka fikir in aad hubisid in CSN ay haysato mar walba cinwaankaaga saxda ah, taas waajib ayey kugu tahay in aad sameysid.

*Ku soo dhawaw in aad nala soo xiriirtid haddii aad su'aalo qabtid, nasiib wacanne dhanka waxbarashadaada!*

CSN nr 2443H/1612